MAGAALADA BOSTON:
MAALIYADDA KAALMADA KIRADA

Maaliyadda Kaalmada Kirada (Rental Relief Fund) waxaa loo samayay in lagu kaalmeeyo reer Boston kuwa ku jira halista in ay lumiyaan guryaha ay kirestaan taasoo ugu wacan dillaca cudurka COVID-19. Maaliyadda waxaa maamula oo maareeya Xafiiska Sugidda Guriyeynta (Office of Housing Stability) (OHS) oo iskaashi la sameya wakaaladaha guriyeynta aan fa'iidada raadinin.

MAXAY SAMAYSAA MAALIYADDA KAALMADA KIRADA?

Maaliyadda Kaalmada Kirada (Rental Relief Fund) waxay bixisaa ilaa $15,000 oo ah kaalmada kirada iyo danabka lana siiyo reeraha xaqa yeesha dakhli ahaan ilaa muddo 12 bil. Reeraha dalban karo waxay heli karaan kaalmada kiradii la soo dhaafay iyo kirada wixii hadda ka dambeeyo. Reeraha qaata kaalmada kirada mustaqbalka waxay u baahan yahiin in ay dib u shahadeyaan dakhliga 3 bil kasta si loo xaqiijiyo baahida sii socota.

Maaliyadda Kaalmada Kirada Magaalada Boston (City Of Boston's Rental Relief Fund) waxay kireesteyaasha ku kaalmeyn karaan kharashka soo socdo:

- Kharashka kirada la soo dhaafay (laga bilaabo Maarso 13, 2020), kharashka kirada iminka socda, iyo ilaa saddax bil kharashka kirada la filaayo
- Kharashka la soo dhaafay (laga bilaabo Maarso 13, 2020), kharashka iminka socda, ama ilaa saddax bil danabka la filaayo (kana mid ah internetka) iyo kharashka quwadda guriga (oo ah $1,500 gunnada danabka)
- Kharashka ku baxa guuritaanka gudaha Magaalada Boston

Maalgelinta looma isticmaali karo waxa soo socda:

- Lacagaha kirada aruurtay ama biilasha danabka bishii Maarso 13, 2020 ka hor
- Lacagaha ku baxa guryaha lagu noolaan karo
- Lacagaha ku baxa milkiileyaasha hantida ee qaraabada la ah xubnaha qoyska (haddii qaraabada aysan ahayn shirkad u shaqeyso sida LLC)

YAA XAQ U LEH IN UU QAATO KAALMADA KIRADA?

Arjiileyaasha waa in:

- ay daggan yahiin Magaalada Boston; IYO
- waa in la caddeeyay in dakhliga soo gala reerka yahay ama ka hooseeyo 80% Dakhliga Dhexe Deegaanka (Area Median Income) (AMI); IYO
- waa in uu saameyay COVID-19; IYO
- waa in ay ku jiraan halista guri la'aanta iyo/ama dagganaasho la'aanta guriyeynta; IYO
- In aysan ahayn arday waqti buuxa ku qoran kulliyad ama ka qalin jebiyay darajada labaad jaamacadda

Reeraha la kabo

- Magaalada Boston iyo Madaxda Guriyeynta Boston (Boston Housing Authority) waxay aasaaseen maaliyad loogu talogalay dadka daggan guryaha dadweynaha BHA ay ku aruurtay kirada. Reeraha ay ku aruurtay hantida BHA muddada Maarso 13, 2020 ilaa iminka waa in ay la xariiraan maamulaha hantidooda. Waxaad kaloo email u diri kartaa rental.relief@bostonhousing.org.
- Haddii aad tahay qof qaata Section 8/MRVP, fadlan buuxi arjiga RAFT (ee laga heli karo halkaan) ama kaalmada kirada ABCD halkaan.

SU'AALAHA BADANAA LEYS WEYDIIYO

XAQ U YEELASHADA (YAA DALBAN KARO)

Yaa loogu talogalay brograamkaan?
Maaliyadda Kaalmada Kirada Magaalada Boston waxaa loo sameyay kireesteyaasha dakhli ahaan xaqa u yeesha ee daggan Boston kuwaasoo dhaqaale ahaan uu saameyay dillaaca cudurka COVID-19 oo u baahan kaalmo si ay u bixiyaan kiradooda iyo/ama danabka. Dagganeyaasha xaqa u yeesha waxaa sannadkii soo gala in ka yar 80% Dakhliga Dhexe Deegaanka (Area Median Income) (AMI), taasoo qiyaas ahaan ah $77,000 reerka ka kooban labo qof.

Maxaa la tixgeliyaa marka la leeyahay dhaqaale ahaan waxaa saameyay dillaca cudurka COVID-19?
Saamaynta dhaqaalaha ugu wacan COVID-19 waxaa ka mid ah:

- Dakhliga oo kaa lumay taasoo ugu wacan meelaha laga shaqeeyo oo la xeray
- Saacado yar oo la shaqeeyo taasoo ugu wacan loo-shaqeeyaha oo yareyay saacadaha
- Luminta xanaanada cunugga iyo/ama dugsiyada oo la xeray taasoo ugu wacan COVID-19
- Luminta shaqada iyo/ama in aan la awoodin shaqada maxaa yeelay waxaa soo kordhay halista COVID-19
- Shaqada oo luntay maxaa yeelay waxaad xanaaneysaa xubin ka tirsan qoyska oo qaba COVID-19

Aniga waxaan ku noolahay guryaha dadweynaha. Xaq ma u yeelan karaa?
Magaalada Boston iyo Madaxda Guriyeynta Boston (Boston Housing Authority) waxay aasaaseen maaliyad loogu talogalay dadka daggan guryaha dadweynaha BHA ay ku aruurtay kirada. Reeraha ay ku aruurtay kirada ee ku jira hantida BHA muddada Maarso 13, 2020 ilaa iminka waa in ay la xariiraan wakaaladda soo saartay fojarkooda ama waa in ay email u diraan rental.relief@bostonhousing.org.

Aniga waxaan dagganahay guri la awoodo oo kiradiisa la soo koobay kaasoo ay kafaalo qaaday LITHC. Xaq ma u yeelan karaa?
Haa, arjiileyaasha daggan qaar ka mid ah guryaha la awoodo waxay u leeyahiin xaq hase.

Mid ama ka badan xubnaha qoyskeyga ma haysto warqadaha sharciga. Xaq ma u yeelan karaa?
Haa, xaq baad u leedahay. Xaaladda socdaalka ma saameyso xaq u yeelashada.

Waxaan la dagganahay dad aan la qeybsado guriga. Ma loo baahan yahay in dhamaan xubnaha reerka dalbadan?
Haddii aad dalbaneysid qeybtaada kirada, magacaada waa in uu ku jiro heshiiska kirada. Haddii aad dalbaneysid xisaabta kirada buuxda, waxaad u baahan tahay dakhliga dhamaan xubnaha reerka si loo ogaado xaq u yeelashada reerka si ay u helaan kaalmo. Haddii aad dooratid qorshahaan, fadlan soo gudbi hal arji halkii reer.

Waxaan iska kireyay qol. Xaq miyaan u yeelan karaa?
Haa, waa loo ogol yahay arjiileyaasha kireeya balse waxay u baahan yahiin in ay keenaan heshiiska kirada ama waxay foomkena (template) u isticmaali karaan sida heshiiska dagganaha.

Waxaa ii socota dacwadda ka-saaridda. Xaq miyaan u yeelan karaa? Kaalmo miyaan ka heli karaa brograamkaan?
Haa. Haddii ay kuu socoto dacwadda ka-saaridda taasoo ugu wacan bixin la'aanta kirada oo la xariirto COVID, weli waad dalban kartaa, hase ahatee, waa in aan weli lagaa bixinin iyo lagaa saarin qeybta. Fadlan ogeysii milkiilaha hantida, wakiilka sharciga, wakaaladda la-tallinta maaliyadda, iyo/ama garsooraha dagmada (haddii lagu dabaqi karo) in aad dalbatay brograamkaan.

Milkiileyaasha guryaha ma yahiin dad xaq u yeesha brograamkaan?
Maya, Maaliyadda Kaalmada Kirada waxaa heli karaa oo keliya kireesteyaasha Magaalada Boston. Milkiileyaasha guriga ee dhibaato kala kulma bixinta deynta guriga waa in ay ka fakaraan qorshaha Kirada Degdegga iyo Kaalmada Deynta guriga (Emergency Rent & Mortgage Assistance) (ERMA) ee laga yaabo in ay la kulmaan baahidaada (macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan labada brograam waxaad ka heli kartaan **halkaan)**

Maxaa laga oran kara dagganeyaasha aan la kulmin habka ay u shaqeyso Maaliyadda Kaalmada Kirada?
Waxaan ogsoonahay in aan kaalmo la siin karin qof kasta oo daggan Magaalada Boston ay waxyeelo ka soo gaartay COVID-19. Shaqaalaha Xafiiska Sugidda Guriyeynta (Office of Housing Stability) waxay diyaar u yahiin in ay ku kaalmeyaan dagganeyaasha sida ay u heli lahayeen ilo kale oo maaliyad ah ama taageero ka timaado gobolka iyo dawladda federaalka, ama hay'adaha aan raadinin fa'iido ee ka jira deegaanka iyo qaranka. Fadlan wac Xafiiska Sugidda Guriyeynta (Office of Housing Stability), telefoonka 617-635-4200 ama email u dir housingstability@boston.gov.

ISTICMAALKA MAALIYADDA (MAXAY YAHIIN NOOCA KHARASHKA LA BIXIN KARO)

Sidee ayay dagganeyaasha u isticmaalaan maaliyaddaan?
Reeraha xaqa u yeesha waxay heli karaan ilaa $15,000 si ay u badbaadiyaan dagganaashadooda ama si ay guryo cusub oo joogto ah uga helaan Magaalada Boston marka ay bixiyaan ugu yaraan qeyb ka mid ah kirada bisha kowaad iyo bisha dambe, marka ay shubaan damaanadda, iyo kharashka guuritaanka. Maalgelinta waxaa kaloo loo isticmaali karaa kaalmada danabka.

Maxay yahiin danabka la bixiyo?
Kharashka ku baxa danabka la ogol yahay waxaa ka mid ah korantada, saliidda kululeynta, gaaska dabiiciga, iyo haa, adeegga internetka.

Maxay yahiin kharashka kale ee la bixiyo?
Kharashka kale ee la xariira guriyeynta, oo si toos ah ama si dadban ula xariira COVID-19, waxaa laga bixiya maalgelintaan. Kharashkaas waxaa ka mid ah:

- Kharashka ku baxa guuritaanka iyo keydinta;
- Shubidda Damaanadda guriga la kireeyo Magaalada Boston;
- Kirada bisha kowaad guriga la kireeyo Magaalada Boston;
- Kirada bishii la soo dhaafay guriga Magaalada Boston; iyo
- Khidmadaha kirada lala soo daaho oo macquul ah oo laguugu soo dallaco.

Kharashka kor ku qoran kama badnaan karaan $15,000 mana la bixin doono muddo ka badan toban iyo labo (12) bil.

Ma jiraan adeegyo la siin doono qoysaska la barakiciyay ee laga yaabo in ay u baahdaan kharash dheeraad ah?
Haa. Adeegyada isku-duuban (wrap-around services) kana mid ah raadinta guriga, kaalmada sharciga, la-tallinta xuquuqda dagganaha iyo tixraacinta dheeraadka waxaa dhici karto in ay bixiyaan OHS iyo wakaaladaha ay ka dhexeyso iskaashiga.

QEYBINTA MAALIYADDA (SIDEE LOO QOONDHEEYAA IYO SIDEE LOO QEYBIYAA)

Sidee loo bixiyaa lacagaha?

- Xagga kirada, lacagaha waxaa toos loo siiyaa milkiilaha hantida.
- Xagga danabka, lacagaha waxaa toos loo siiyaa bixiyaha daryeelka.
- Lacagaha waxaa toos loogu soo diri doonaa maamulaha hantida iyo/ama bixiyeyaasha danabka via jeeg ama ACH. Lacagta waa in ay ku timaado muddo 7-10 maalin gudahooda kaddib marka la ogeysiiyo arjiga la ogolaaday.

Sidee ayaad ku gaartaan go'aanka cidda qaadan doonto kaalmada?
Arjiyada waxaa la marsiin doonaa fiirin hore kaddib marka la soo gudbiyo. Hubinta hore ee lagu ogaado xaq u yeelashada iyo waxyaabaha dhamaystirka, mid ka mid ah saddaxda wakaaladaha iskaashiga maaliyadda ayaa xaqiijin doono arjiyada. Inta ay socoto hawsha xaqiijinta ugu dambayso, shaqaalaha wakaaladaha iskaashiga waxay xaqiijin doonaan xaq u yeelashada AMI, waxay fullin doonaan xisaabinta baahida, iyo waxay codsan doonaan in warqadaha loo baahan yahay laga soo qaado milkiilaha/ maamulaha hantida arjiilaha

Haddii aan dalbado kaalmo, ma la hubaa in aan heli doono?
Maya. Waxaan fileynaa in aan helno arjiyo badan oo la xariira Maaliyadda Kaalmada Kirada. Nasiib darro, ma aha in arjiile kasta la siin doono kaalmo. Waxaan haysanaa xisaab kooban oo la xariirta maal gelinta la heli karo waqtigaan, waxaan bixin doonaa lacagaha ilaa maaliyadda ka dhamaato.

Ma u baahanahay in aan dalbado mar kale haddii aan horay u qaatay kaalmo?
Haa. Kani waa brograam cusub oo lagu raadiyo maal gelin cusub, waxaad u baahan tahay in aad soo gudbisid arjicusub.

HAWSHA ARJIGA (MAXAAN U BAAHANAHAY SI AAN U DALBADO IYO MAXAA DHACA KADDIB MARKA AAN GUDBIYO ARJIGA)

Maxay yahiin warqadaha aan u baahan doono in aan keeno?

- Koobiga heshiiska kirada la saxiixay ama heshiiska dagganaha (tusaale ahaan, waxaad halkaan ka heli kartaa heshiiska dagganaha)
- Sawirka qofka madaxa ka ah reerka
- Dabada jeegagga mushaarka la qaato (labo jegagga mushaarka ugu dambayay)
- Warqadaha manaafacaadka shaqo la'aanta (haddii lagu dabaqi karo)
- Warqadaha isku qoridda MassHealth (leyska dhaafi karo)
- Warqadaha SNAP/EBT (leyska dhaafi karaa)

Maxaa dhaca haddii aan haysanin heshiiska kirada?
Waxaan samaynay qaabka heshiiska dagganaha (halkaan) ay arjiileyaasha isticmaali karaan si ay ula kulmaan qodobka warqaddaan. Waxaad u baahan tahay in milkiilaha/maamulaha hantida saxiixaan foomkaan. Saxiixa elataroonigga waa la ogolaan karaa. Waxaan kaloo ogolaan doonaa oraah qoran aad ka soo qaadatid milkiilaha hantida/maamulaha hantida ama biilka danabka la bixiyay laguna soo qoray cinwaanka si loo caddeeyo dagganaashada.

Maxaa dhaca haddii aanan dagganeyn guriga kirada iminka jira marka COVID-19 bilowday?
Adiga waxaad weli dalban kartaa in lagaa kaalmeeyo kirada iyo/ama biilasha danabka. Ma jiro qodob ku xeran muddada aad daggan tahay hantida aad iminka kireysatay.

Maxaa dhaca haddii aan qabin email?
Fadlan wac Xafiiska Sugidda Guriyeynta (Office of Housing Stability) si aad telefoon uga buuxisid arjiga.

Ma jiraa arjiga warqadda ama siyaabo kale oo loo dalbado?
Waqtigaan ma jiro arjiga warqadda oo loo isticmaalo Maaliyadda Kaalmada Kirada? Haddii aad dhibaato kala kullantid buuxinta foomka internetka, fadlan la xariir Xafiiska Sugidda Guriyeynta (Office of Housing Stability) si aad telefoonka ugu buuxisid. Haddii aad heli kartid qalabka mobileka, balse aadan geli arin internetka, fadlan booqo mid ka mid ah goobaha wifi ee loogu talogalay dadweynaha magaalada. Dhowr ka mid ah laamaha Maktabka Dadweynaha Boston waxay iminka wifi siyaan dibadda:

- Brighton
- Codman Square
- Connolly
- East Boston
- Egleston Square
- Grove Hall
- Honan-Allston
- Hyde Park
- Lower Mills
- Mattapan
- Parker Hill
- Roxbury
- South End
- West Roxbury

Maktabka Dadweynaha Boston (Boston Public Library) waxaa kaloo laga helaa internetka lagu magacaabo "WIFI hotspots" si aad u amaahatid (waxaad macluumaad badan ka heli kartaa halkaan) iyo waxaa laga helaa ballamada gelitaanka kombuyutarada dadweynaha Maktabka Dhexe (Central Library) ee ku yaal Copley Square (macluumaad badan waxaad ka heli kartaa halkaan).

Maxaa dhaca kaddib marka aan soo gudbiyo arjigeyga?
Waxaa laguu soo diri doonaa email kuu xaiijsa in arjigaada la gudbiyay. Kaddib marka aad soo gudbisid, waxaa la fiirin doonaa haddii arjigaada uu dhamaystiran yahay. Kaddib marka la fiiriyo, arjigaada waxaa lagu wareejin doonaa wakaalad aan iskaashano. Adiga iyo milkiilaha/maamulaha hantida waxaa idinla soo xariiri doono maamulaha kiiska ee loo xilsaaray wakaaladda si loo helo warqadaha dheeraadka ama macluumaadka laga yaabo in ay lagama maarmaan u yahiin si loo dhamaystiro arjiga. Haddii aadan helin xaqiijinta email kaddib marka aad soo gudbisid arjigaada, fadlan dib u soo gudbi arjigaada.

Maxaa ku xiga haddii aan helo ogeysiis sheegaaya in aan xaq u lahayn, balse Aniga aan aaminsanahay in aan xaq u leeyahay?
Emailka ogeysiiska laguu soo diro waxaa la socdo kor ka eegidda lagu samayay warqadaha aad soo gudbin kartid si loo xaqiijiyo xaq u yeelashadaada. Fadlan, waxaad warqadahaan xaqiijinta u gudbisaa Xafiiska Sugidda Guriyeynta (Office of Housing Stability) (email: RRF@boston.gov) muddo 5 maalin gudahooda laga bilaabo marka aad heshid ogeysiiska in aadan xaq u lahayn.

Maxaa loo baahan yahay in aan sameeyo haddii aan ogaado in aan qalad ku samayay arjigeyga?
Fadlan waxaad email u dirtaa rrf@boston.gov haddii baddalaad lagu samayo arjigaada. Haddii arjigaada lagu wareejiyay wakaalad aan iskaashi la leenahay, fadlan la xariir maamulaha loo xilsaaray kiiskaada.

Maxaa dhaca haddii milkiilaha hantida uusan ka jawaabin ama haddii uu diido in uu ka qeybqaato brograamkaan?
Xaaladaha marka milkiileyaasha hantida aysan ka jawaabin ama diidaan ka-qeybgal, maalgelinta waxaa loo isticmaali karaa waxyaaba soo socdo:

- Damaanadda lagu qabsado guryaha cusub ee Magaalada Boston
- Kirada bisha kowaad/dambe si guri cusub looga helo Magaalada Boston
- Kharashka guuritaanka si guri cusub looga helo Magaalada Boston

SU'AALAHA KALA DUWAN

Sidee loo maalgeliyaa brograamkaan?
Magaalada Boston iyo Waaxda Horumarinta Xaafadda (Department of Neighborhood Development) waxay isticmalaan maaliyadda federaalka ee Maaliyadda Kaalmada Kirada (Rental Relief Fund).

Maxay yahiin badbaadinta sharciga ay haystaan dagganeyaasha ay waxyeelada ka soo gaarto COVID-19?
Xarumaha Kantaroolka Cudurka (Centers for Disease Control) (CDC) waxay soo saareen joojinta ka-saaridda federaalka ee laga yaabo in aad xaq u yeelatid. Macluumaad dheeraad ah iyo foomka bayaanka loo baahan yahay ee adeegsada dalabka waxaa laga heli karaa halkaan.

Haddii uu ogeysiis sharci ah aad ka heshay milkiilaha hantida oo kaa codsada in aad ka baxdid guriga, fadlan booqo boggaan internetka si aad u heshid kaalmada sharciga.

OHS waxay ballan qaaday in ay hubiso in dadka daggan Magaalada Boston helaan dhamaan ilaha sharciga la heli karo iyo in ay dagganeyaasha ku dhiirigeliso in ay booqdaan boston.gov/housingstability, xafiiskena kala xariiraan 617-635-4200 ama email u dir housingstability@boston.gov haddii aad qabtid su'aalo.

Lacagaha kicinta dhaqaalaha ma yahiin kuwo loo xisaabo sida dakhliga reerka?
Maya, jeegagga kicinta dhaqaalaha reerka looma xisaabo sida dakhliga.

Maxay tahay sababtaa aad ula socotiin xogta isirka iyo dhallashada?
Tani waxaa soo codsatay Dawladda Federaalka si loo hubsado in aan u hoggaansanahay qodobada sinaanta deynta, guryaha iska roon iyo sharciyada kashifaadda deynta guriga. Adiga lagaama rabo in aad keentid macluumaadkaan, balse waxaa laguugu dhiirigelinaa in aad sidaas samaysid. Tan ku saabsan isirka, waxaad calaameen kartaa in ka badan hal shay. Haddii aadan rabin in aad bixisid macluumaadka, fadlan calaamee sanduuqa ku habboon.

Maxaa loola jeedaa labolaabidda manaafacaadka ama maxaa dhaca haddii aan kaalmada kirada ka qaato meel kale?
Maaliyadda Kaalmada Kirada looma isticmaali karo in lagu bixiyo kaalmada kirada iyo/ama danabka ay horay u bixiyeen ilaha kale maaliyadda. Haddii aad horay u dalbatay ama aad qorsheysatay in aad kaalmo ka dalbatid ilo kale, codsigaada kaalmada kirada aad ka heshid maaliyaddaan waa in ay bixiyaan bilo kala duwan adeegga. Tusaale ahaan, haddii aad horay kaalmada kirada uga heshay/dalbatay ilo kale bilaha Maarso iyo Abriil, bilahaas kama mid noqon karaan codsigaada maaliyaddaan.

Kaalmada kirada ee laga qaato Maaliyadda Kaalmada Kirada ma loo haystaa in ay tahay manaafacaad sida kharashka lagu soo dallaco dadweynaha (public charge test)?
Maya, Maaliyadda Kaalmada Kirada (Rental Relief Fund) looma haysto in ay ka mid tahay kharashka lagu soo dallaco dadweynaha (public charge test) ee federaalka. Kaalmada laga helo Maaliyadda Kaalmada Kirada kama mid aha manaafacaadka lacagta "caddaanka" ama manaafacaadka "aan ahayn lacagta caddaanka" ee ku qoran liiska sharciga "kharashka lagu dallaco dadweynaha" (public charge rule).

Xafiiska Horumarinta Muhaajirka ee Duqa Magaalada (Mayor's Office for Immigrant Advancement), iyadoo aan la fiirinin xaaladda muhaajirka ku sugan yahay, waxaa laga helaa ilo ku hoggaamiya, booqo bogga internetka boston.gov/immigrants. Waxaan kaloo ku dhiiri gelineynaa dagganeyaasha arrimo ka qaba kharashka lagu dallaco dadweynaha (public charge test) in ay la xariiraan Adeegyada Sharciga Greater Boston (Greater Boston Legal Services), telefoonka 617-371-1234 iyo Machadka Baddalaadda Sharciga MA (MA Law Reform Institute), telefoonka 617-357-0700.

Aniga waxaa iga luntay shaqadeyda taasoo ugu wacan COVID-19, sidee ayaan ku dalbadaa manaafacaadka shaqo la'aanta?
Haddii aadan weli horay u dalbanin kaalmada shaqo la'aanta, fadlan booqo bogga internetka Mass.Gov si aad u aragtid Macluumaad Muhiim ah oo ku saabsan Shaqada si aad u dalbatid. Sida ugu dhakhsiyaha badan waxay tahay in aad ka dalbatid internetka, hase ahatee haddii aad u baahan tahay kaalmo, waxaad halkaan ka buuxin kartaa foomka xariirinta ama wac telefoonka 617-626-6800 ama 877-626-6800 (waxaa laga helaa kaalmo Isbanish iyo Bortuqiis). Waxaa kaloo jirta tilmaanta talaabo-talaabo oo ku saabsan sida loo dalbado. Halkaan Su'aalaha Badanaa Leys Weydiiyo (FAQs) oo loogu talogalay Dadka Raadiya Shaqo, waxaad ka heli kartaa wax badan oo ku saabsan ballaarinta manaafacaadka shaqo la'aanta taasoo la xariirta Sharciga CARES si loo kaalmeeyo qofka iskiisa u shaqeysto, qandaraasleyaasha madax banaan shaqaalaha "gig" (sida wadeyaasha baabuurta leysla qeybsado) iyo kuwo kale.